Risaalo Maalinta Jaceylka Valentine's Day

الحمد لله رب العالمين والصلاة والسلام على أشرف الأنبياء والمرسلين نبينا محمد وعلى آله وصحبه أجمعين

Mahad oo dhan Alaah iska leh Rabiga caalam ka abuurey Allaha ha amaano nabigeena sharafta badnaay anbiyada kan ugu fadliga badan&anbiyada lasoo direy dhamaantood

Taariikhda Maalinta Jaceylka : Waa Maxay **Valentine's Day** (**Maalinta Jacaylka**) **14th February** Waxaa naxdin ah in maanta dad Muslimiin ah ay xusayaan Baadari Christan ah geeridiisa iyo Wax ay caabudi jireen Roman kii hore !. Waxaan galaynaa meel walba oo ay gaaladu galaan waxaana samaynaynaa wax walba oo ay gaaladu sameeyaan, Xataa waxaan la galnay cibaadadoodii iyo xusaskoodii ay ku waynaynayeen dad ama wax ay caabudi jireen.

Haddaba waxaa loo baahan yahay in aan iska fiirino oo aan wax aqrino. Waa inaan ogaannaa waxa aan sameyneyno waa maxay? diintu maxay ka leedahay? yaana noo keenay?.

Qoraalkaan waxaan ku sharixi doonaa waxa uu yahay Valentine's iyo halka uu ka soo bilowday iyo diintu waxa ay ka qabto.

Waxaa loo yiraahdaa waa dhaqan romans lahaan jireen

Asalka Valentine's Day

Marwalba oo ay taariiqdu ku beegantahay **14** February waxaa dunida gaalada looga dabaal dagaa maalin loogu magac daray St. Valentine (Valentine's Day) ama Maalinta Jacaylka, laakin waxaa iswaydiin mudan waa kuma ninkaasi? Maxaana loogu dabaal dagaa maalintaas iyo magiciisa Valentine maxaa keenay?

Valentine's Day ama Maalinta Jacaylka waa xasuus ama xus la xuso Christian (Kirishtan) iyo Roman -kii hore. Marka aan isweydiinno kumuu ahaa Saint Valentine, muxuuna ugu xiranyahay xuskaas diimeed?

Maalintaas waxay bilaabatay xilligii boqortooyada Roman ka. Romain kii hore, 14th Ferbruary waxay u ahayd maalin ay weyneeyaan Juno. Juno waxay ahayd boqorad kamid ah Ilaahyada Roman-ka. Romans-ka waxay kaloo u aqoonsanaayeen Juno Ilaaha haweenka iyo guurka.

Maalinta ku xigta oo ah ,**15th** February, waxaa bilowda xuska Lupercalia oo isna ahaa wax ay caabudi jireen.

Taariikhda Valentine's Day

Nolosha wiilasha iyo gabdhaha waa ay kala fogayd xilligaas. Waxyar ka hor u dabaaldagidda **Lupercalia** magacyada gabdhaha Roman ka waxaa lagu qori jiray warqado isla markaana waxaa lagu dhajin jiray sabuurad. Wiilasha dhalinyarada ah waxay ka dooranaayaan gabadha ay rabaan waxayna haysanayaan inta uu socdo dabaaldagaas, markaas kadib ayaa laga yaabaa in ay ilmo ka dhex dhashaan oo ay kadib is jeclaadaan ama is guursadaan.

ka boqortooyadii la oran jiray Emperor Claudius II Rome wuxuu gali jiray dagaallo dhiig badan uu ku daato. ***Boqor-ka Claudius*** wuxuu ku dhibanaa in uu helo askar si uu u xoojiyo milatarigiisa iyo dagaallada uu galayo. Wuxuu rumaysnaa in aynan nimanka Romans-ka aynan rabin in ay ka tagaan jeceelkooda iyo qoysaskooda. **Boqorkii Claudius** wuxuu ka joojiyay Boqortooyadii Rome guurkii oo dhan wuxuuna mamnuucay in la is guursado si ninku uunan u yeelan qof uu ku xirnaado.

Valentine xilligaas wuxuu ahaa Waziir dhinaca Kaniisadaha iyo Diinta kana tirsanaa dowladdii Claudius II. Isaga iyo **Saint Marius** waxay taageereen dhibanayaashii Christian (Kirishtanka) ahaa oo loo diiday guurka, dhowr qofna si qarsoodi ah ayay isugu dareen. Arintaas daraadeed **Saint Valentine** waa laqabtay waa la xiray waana la garaacayay ilaa uu ka dhinto.

14th February ayaa waxaa dhintay Saint Valentine, **sanadkiisii 270**. Taariiqdaas Rome waxay ka noqotay mid khaas ah oo la xuso sanadwalba bisha February (Lupercalis), waana la faafiyay ayadoo lagu waynaynayo waxa ay ku sheegaan ilaaha Lupercalis.

Madaahibta Protestan (Protestant Christian Church) ka ee Rome waxay iyadana dooratay ama aqoonsatay **Saint Valentine's Day** (**Maalinta Jacaylka Aduunka**) in la dabaaldago sanad walba 14th February.

Haddaba Diinta Islaamku Maxay Ka Qabtaa Dabaaldagga Maalintaas :

فتوى الشيخ عبد الله بن جبرين في الاحتفال بعيد الحب

Fatwadda Sh.Cabdulaahi Ibnu Jabariin : Dabaal Degga Maalinta Jacaeylka

سئل فضيلته

Waxaa La weydiiyey Sheekha Su"Aal

انتشر بين فتياننا وفتياتنا الاحتفال بما يسمى عيد الحب

Waxaa ku faahfaahtey (Ifbaxadey) Dhalinyarada Gabdhaha ah iyo Kuwa Wiilasha ah Dabaal Degga Lagu Magacaabo Maalinta Jaceylkaز

وهو اسم قسيس يعظمه النصارى يحتفلون (Valentine's Day يوم فالنتاين) به كل عام في

Valentine's Day (Waana ciida ay udabaaldegaan dadka gaalada ah (nasraaniyiinta) Sanadkasto Bisha Febraayo 14 Keeda

فبراير، 14

، 14 Ka Febraayo

ويتبادلون فيه الهدايا والورود الحمراء،

``Waxay isa siinaya ama kala gudoomayaan hadiyado midab cascas (gadgaduudan)

ويرتدون الملابس الحمراء،

Waxay Soo Labisanayaan Dhar gadgaduudan

فما حكم الاحتفال به أو تبادل الهدايا في ذلك اليوم وإظهار ذلك العيد جزاكم الله خيرًا.

Maxay noqonaysaa xukunkeeda maalintaas lamuujinaayo maalin ciid oo dabaaldeg ah Hadiyadao lais dhaafsanaayo jazklaahu kheyran.

فأجاب حفظه الله:

Waa u jawaabey allaha xafido

أولاً’

لا يجوز الاحتفال بمثل هذه الأعياد المبتدعة؛ :

Marka hore ma banaana dabaldega noocan oo kalewaa ciido la gu soo darey diinta islaamka ah

لأنه بدعة محدثة لا أصل لها في الشرع فتدخل في حديث عائشة رضي الله

Maxaa yeelay bidcadda la soo guuriyey oo asal kulahayn sharciga islaamka waxay soo galeysaa xadiiskii caisha warisey allaha ka raali noqda Waxay tiri:

عنها أن النبي صلى الله عليه وسلم قال

أي مردود على من أحدثه (من أحدث في أمرنا هذا ما ليس منه فهو رد) :.

Qofkii wax ku soo darra (Kordhiya) diinta islaamka ah oo aan ku jirin waa lagu celin qofkaas waxa uu kusoo darey ama kusoo kordhiyey

Marka Labaad: ثانياً

أن فيها مشابهة للكفار وتقليدًا لهم في تعظيم ما يعظمونه واحترام أعيادهم

Waxay ahaaneysaa Gaalo La iska dhigdhigo (Lagu Daydo) iyagoo La Raacayo Lana Weynaynaayo Waxay Weeyneeyaan Lana Ixtiraamyo Ciidahooda.

وفي الحديث: (من تشبه بقوم فهو منهم).

Xadiiska Rasuulka s.c.w Wuxuu ahaay Qofkii qolo (Qoom) Iska Dhigdhiga (Isku Shabaha)uusan ahayn iyaga ayuu kamid yahay Yacni Gaal aada ahayn ayaad iska dhigtey .

➢**Wixii Fataawooyin** : arintaas ah waxaad ka helaysaan Halkaan **http://www.saaid.net/mktarat/7oob/f.htm**

Maalinta Jaceylka: Waxaa loo yaqaanaa ``Valentijday Maalintii Jaceylka Waana 14 ( Afar iyo Tobanka ) Febraayo Sanadkasta `` Maalintaas maloo baahanyahay? Jawaabta waa mayya Maxaase Looga kaaftoomi Karaa?``Waxaad uga kaaftoomi kartaa diintaada inaad

barato ma tahay maalin islaamka jideeyey mise mayya ?

``Ilaahay iyo Rasuulkiisa ayaa inoo sheegi lahaayeen hadey Muslimiinta Kheyr utahay ama Maalin Lasharfo oo Loo Dabaaldego Tahay Marka Waa Xaaram in Qofka Muslinka Uu Ka Qaybgalo ama u tahniyeeyo ama nac nac ama shukulaato caruurta u qaybsha.

الحب

ما أجملها من كلمة!

``Jacayl Hadalkaan maxaa ka wanaagsan``

فكم تحتاج النفس إليه، و كم تتعطش القلوب له وسعادة الروح،

،Nafta aadbey ug baahantahay , Naftana wey u oomantahay jaceylka markii laga hadlo iyo Badbaadada Nafta.

Jaceylka Islaamka: Waa Mid aan dhamaanin oo qiimo iyo sharaf ku sugan da"akastoo jirto.

الحب في الإسلام

Jaceeylka Islaamka Waa mid aan Dhamaanin.

يا فتيات الإسلام.....يا شباب الإسلام

Gabdhaha Islaamka ah & Dhalinyarada Islaamka ah.

إن الحب ليس حراماولكن أي حب، إنه الحب الطاهر حب الأزواج،

‘

Jaceylka Xaraam maahin Laakiin Jaceylka Muuqda Waa Midka Dadka Is guursadey.

حب قال الله فيه

Jaceylka Wuxuu Allah Yiri:

{ وَمِنْ آيَاتِهِ أَنْ خَلَقَ لَكُم مِّنْ أَنفُسِكُمْ أَزْوَاجاً لِّتَسْكُنُوا إِلَيْهَا وَجَعَلَ بَيْنَكُم مَّوَدَّةً وَرَحْمَةً إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِّقَوْمٍ يَتَفَكَّرُونَ}

Aayaadka Alle waxaa kamid ah In Ilaahay Naftiina ka abuurey Xaasas(Dumar) Si aad ugu xasishaan wuxuun adhexdiina yeelay Kalagacal iyo isu turis arintaas waxaa ku sugan aayado hadaad tihiin dad fakeraayo.

[الروم:21]. Suurada Ruum Aayada 21

حب قال الله فيه

Jaceylka Wuxuu Allah Yiri:

{هُنَّ لِبَاسٌ لَّكُمْ وَأَنتُمْ لِبَاسٌ لَّهُنَّ}

Dumarkiina Dhar (Maro) bey idiin yihiin Idinka (Ragga) Dharbaad (Maro) u tihiin .

[البقرة:187]

،فهيا بنا لنعرف الحب النظيف الطاهر

Kaalaya Aan garano jaceylka dhabta ah Ee Nadiifka ah.

حب النبي محمد لبنت الأطهار، ابنة صاحبه في الغار

Jaceylkii Nabiga maxamed *صلى الله عليه وسلم* gabadhii uu dhaley saaxibkiisa ay go"dkii wada galeen safarkii dheeray ee hijrada waxaa loo jeeda gabdhaii abiibakar رضي الله

، عائشة أم المؤمنين الأبرار، فقد كان لعائشة رضي الله عنها منزلة خاصة في قلب رسول الله

Caaisha umu muminiin rasuulka waxay ka joogtey caa"isha meel khaas ah qalbigiisa nabeegeena suubanay .

صلى الله عليه -

حتى إنّه لم يكن يخفي حبّها عن أحد،

Xitaa qofna kama qarsoonayn jaceylka uu caisha u qabo rasuulkeena suubanay.

وبلغ من حبّه لها أنه كان يشرب من الموضع الذي تشرب منه

Wuxuu gaarey jaceylkeena wuxuu ka cabi jirey koobka meesha ay afka saarto oo ay iyada kacabtey taas waxad arkeysa kama uusan waswaasi jirin marka jaceylka dhabta ha waa midkaas uu rasuulkeena

s.c.w uu jeclaay caisha**umu_caisha** ay رضي الله عنها

، ويأكل من المكان، الذي تأكل

Wuxuu wax ka cuni meesha ay saxanka kacunto marka waxad arkeysa in rasuulkeena s.c.w *صلى الله عليه وسلم* oo aad isugu dayi jirey in caisha **umu_caisha** ay رضي الله عنها jaceylkeeda muujiyo annaga waxad arkeysaa haduu qofka yiraahdo xaaskeyga jeclahay inay ceeb tahay .

وعندما سأله عمرو بن العاص رضي الله عنه أي الناس أحب إليك يا رسول الله ؟، قال له:

Goor uu su"aaley **Cumar ibnu Caas** رضي الله oo yiri **:** Rasuulkii *صلى الله عليه وسلم* aloow Dadka Yaad ugu Jeceshahay **:**

صلى الله عليه وسلم ـعائشة،

Rasuulka s.c.w Wuxuu Yiri : **Caisha**رضي الله عنها

➢**Rasuulkeen s.c.w :** Wuxuu ahaay mid safarada ama duulaamada qaarkood mid la baratama xaaskiisa caisha marna wey ka badisey marna wuu ka badshey yacni wuu ka dheerey markii danbe ay cuslaatey oo miizan fuuley caisha wuxuu yiri tan tii hore isu tuur marka sidaad waxa layiraahdaa jaceyl mararka qaar dhabteeda ayuu ku seexan jirey ilaa uu ku geeriyoodey dhabteeda **Caisha** رضي الله عنها .

➢ **Rageena** majiraa qof xaaskiisa sidaas ula baratama hadey jirtana waxaan filaay waa nadir fara ku tiris marka bal waa in aan iska doon doonaa sida rasuulkeena sameyn jirey.
Marka tan danbe waa lasmeeya inta badan maashlaah.

دعوة إلى الحب

Dacwada Jaceylka Dadka Loogu Yeera

يا فتيات الإسلام .....يا شباب الإسلام

Gabdhaha Islaamka ah & Dhalinyarada Islaamka ah.

أدعوكم إلى الحب، الحب الدائم، حب ليس له يوم، بل حب كل يوم،

Waxaan idiinku yeeri Jaceylka ,Jaceylakaaso joogto ah Mana ahan Jaceyl Maalin Kaliya Jaceyl Maalinkasto ah ee maahin inaa cado

gaalada ama yahuuda qaadano .

Digniin : Jaceylkaan ka hadleyna waa jaceylka sharciga islaamka ogolyahay labo qof oo guur xalaal isku qaba ee kama hadleyna dad aan xalaal isku qabin ee saaxiibo nahay yiraahdaa islaamka ma ogola saaxibtinimadda labo qof rag iyo dumar ah dhexmarta .

➢ **Waxaa xaraam ah :**

>Tahniyada maalinta jaceylka
>Email isugu hambalyeeyn
>Telefoon laysugu hambalyeeyo
>Happy valenday Lai s dhaho
>Xaflada laga qaybgalo
>Loodabaaldego maalintaas
>Nac nac Loo Qaybsho Caruurta.

Ilaahaan Uga Mahad Celin **الحمد لله رب العالمين** Oo Ii Fududeeyey Inaan qoro **Risaaladaan** **Valentine's Day** oo i Waafijiyey aan Walaaladayda aan Ugu soo Gudbiyo Luuqadda Af Soomaliga Marka Waxay Khaladaad Yeelato Risaaladaan Ama Gaabinah &Luuqada Soomaliga Erayad qaarkood Aan Qeexi waayo Waxay Ka timid Nafteyda & Shaydhaan Waana Uga Toobad Keeni **Allaah** iyo **Rasuulkeena S.c.w** Bari Ayeey Kayihiin Naseexadiina Waan U Baahanahay Yaan La iga Iloobin Walaalkasto Ka Faaideysta Ama Akhristo ama Wax Kusii Daro Ilaahay (i weydiiya) iiga Barya Aniga & Labadayda Waalid & Reerkayga In Allaah na Waafijiyo Tubta Toosan **&** Khaatimo Toosan.

Waxaa Qorey : Walaalkiin ***Cabdiladhiif Aadan***
Akhiizubeyr_1@hotmail.com

Saturday, February 13, 2010

هذا والله أعلم
لا تنسونى بالدعاء أخوكم زبير_١